



**JUMHUURIYADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA**

GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

**QARAAR KU SAABSAN
DOORASHADA GUDDOONKA GOLAHA
SHACABKA
GUDDOOMIYAHA IYO GUDDOOMIYE
KU-XIGEENNADA 1AAD IYO 2AAD**

Muqdisho, 27^{da}-28^{da} Abriil 2022

GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

Markuu Arkey: Qodobka 65(4) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

Markuu Arkey: Qodobka 13(8)(9)(11) ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka;

Markuu Arkey: Taariikh Nololeedka Murashaxiinta u tartamaya qabashada Xilka Guddoonka Golaha Shacabka (Guddoomiyaha, Guddoomiye Ku-xigeennada 1aad iyo 2aad);

WUXUU GO’AAMIYEEY QODOBBADA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad:
Doorashada Guddoomiyaha Golaha Shacabka

Xilka Guddoomiyaha Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad ee Soomaaliya waxaa ku tartamay Todoba (7) Murashax waxaana goobjoog ahaa oo codeynayey 252 Xildhibaan. Natijada Doorashada waxay noqotay sida ku muuqaalisan shaxdan:

Wareegga	Cododka xumaaday	Cododka ansaxay	Wadarta Guud
1-aad	0	252	252
2-aad	0	252	252

Lr.	Magac	Wareegga 1aad	Wareegga 2aad
1.	Xil. Sh. Aadan Maxamed Nuur “Madoobe”	74 (29%)	163 (64.7%)
2.	Xil. Xasan Cabdi Nuur	98 (38.8%)	89 (35.3%)
3.	Xil. Cabdullaahi Aadan Axmed “Black”	33 (13%)	-
4.	Xil. Adan Maxamed Nuur “Saransoor”	23 (9.12%)	-
5.	Xil. Shariif Maxamed Cabdullaahi	13 (5.15%)	-
6.	Xil. Cabdirashid Maxamed Xidig	6 (2.3%)	-
7.	Xil. Saadaq Cabdullahi Cabdi	5 (1.98%)	-

Inta aan la gudagelin wareegga 2aad waxaa iskood uga tanaasulay Xil. Cabdullahi Aadan Maxamed “Black” iyo Xil. Aadan Maxamed Nuur “Saransoor” oo xaq u lahaa iney tartamaan. Saa daraadeed waxaa loo gudbay wareegga 3aad maadaama ay isku soo hareen laba murashax kaliya.

Fiiro gaar ah: Murashax Xil. Sh. Aadan Maxamed Nuur “Madoobe” ayaa ku guuleystay Xilka Guddoomiyaha Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad ee Soomaaliya maadaama uu helay cododkii loo baahnaa wareegga 3aad oo ah (50%+1) iyo dheeraad tirada guud ee xildhibaannada coddeyneysay.

Qodobka 2aad:

Doorashada Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka

Xilka Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad ee Soomaaliya waxaa ku tartamay Toban (10) Murashax waxaana goobjoog ahaa oo codeynayey 241 xildhibaan. Natijada Doorashada waxay noqotay sida ku muuqaalisan shaxdan:

Wareegga	Cododka xumaaday	Cododka ansaxay	Wadarta Guud
1-aad	0	241	241
2-aad	0	241	241

Lr.	Magaca Murashaxa	Wareegga 1-aad	Wareegga 2-aad
1.	Xil. Sacdiya Yaasin Xaaji Samatar	52 (21.57%)	133 (55.19%)
2.	Xil. Maxamed Cali Cumar “Caananuug”	58 (24%)	108 (44.81%)
3.	Xil. Maxamed Weli Cabdalla Axmed	59 (24.48%)	-
4.	Xil. Khadija Maxamed Diiriye	21 (8.7%)	-
5.	Xil. Cabdikariin Cabdow Xaydar	15 (6.22%)	-
6.	Xil. Maxamud Cabduqaadir Xaaji “Jeego”	12 (4.97%)	-
7.	Xil. Cabdiraxmaan Cabduqaadir Cadde	8 (3.3%)	-
8.	Xil. Saciid Maxamed Maxamuud Xeyd	7 (2.9%)	-
9.	Xil. Maxamed Nuur Abuubakar	5 (2%)	-
10.	Xil. Maxamed Cumar Ceymoy	4 (1.65%)	-

Inta aan la gudagelin wareegga 2aad waxaa iskood uga tanaasulay Xil. Maxamed Weli Cabdalla Axmed iyo Xil. Khadiija Maxamed Diiriye oo xaq u lahaa iney tartamaan. Saa daraadeed waxaa loo gudbay wareegga 3aad maadaama ay isku soo hareen laba murashax kaliya.

Fiiro gaar ah: Murashax Xil. Sacdiya Yaasin Xaaji Samatar ayaa ku guuleystay Xilka Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad ee Soomaaliya maadaama ay heshay cododkii loo baahnaa wareegga 3aad oo ah (50%+1) iyo dheeraad tirada guud ee xildhibaannada coddeyneysay.

Qodobka 3aad:

Doorashada Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka

Xilka Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad ee Soomaaliya waxaa ku tartamay Todobo (7) Murashax waxaana goobjoog ahaa oo codeynayey 241 xildhibaan. Natijada Doorashada waxay noqotay sida ku muuqaalisan shaxdan:

Wareegga	Cododka xumaaday	Cododka ansaxay	Wadarta Guud
1-aad	0	241	241
2-aad	0	241	241

Lr.	Magaca Musharraxa	Wareegga 1-aad	Wareegga 2-aad
1.	Xil. Cabdullahi Cumar Abshir “Abshirow”	43 (17.84%)	146 (60.58%)
2.	Xil. Mahad Cabdalle Cawad	87 (36%)	95 (39.41%)
3.	Xil. Saciid Maxamed Cali	38 (15.76)	-
4.	Xil. Ayuub Ismaaciil Yusuf	24 (9.95%)	-
5.	Xil. Maxamed Xuseen Abuukar “Garaxo”	24 (9.95%)	-
6.	Xil. Asad Cabduqaadir Maxamed	18 (7.46%)	-
7.	Xil. Dr. Axmed Aadan Axmed	7 (2.90%)	-

Inta aan la gudagelin wareegga 2aad waxaa iskood ugu tanaasulay Xil. Saciid Maxamed Cali, Xil. Ayuub Ismaacil Yuusuf iyo Xil. Maxamed Xuseen Abuukar “Garaaxo” oo xaq u lahaa iney tartamaan. Saa daraadeed waxaa loo gudbay wareegga 3aad maadaama ay isku soo hareen laba murashax kaliya.

Kalfadhiga: 1aad

Kulankiisa: 4aad iyo 5aad

Fiiro gaar ah: Murashax Xil, Cabdullahi Cumar Abshir “Abshirow” ayaa ku guuleystay Xilka Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad maadaama uu helay cododkii loo baahnaa wareegga 3aad oo ah (50%+1) iyo dheeraad tirada guud ee xildhibaannada coddeyneysay.

Qodobka 4ad:**Guddoonka Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad**

Xil. Sh. Adan Maxamed Nur “Madoobe”
Xil. Sacdiya Yaasin Xaaji Samatar
Xil. Cabdullahi Cumar Abshir “Abshirow”

Guddoomiyaha Golaha Shacabka
Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad
Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad

M.ne Cabdikariin Xaaji Cabdi Buux
Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka

Xil. Cabdirisaaq Cumar Maxamed
Guddoomiyaha Guddiga Doorashada

Xil. Cabdisalaam Xaaji Axmed Liibaan “Dhabancad”
Guddoomiyaha KMG ee Golaha Shacabka